

# Maxaa ka socda

## Lakeridge Playground and Playfield

Seattle Parks and Recreation (Beerta Nasashada iyo Madadaalada Seattle) waxaa lagu samayn doonaa dayactir aaga ciyaarta iyo garoobka kubada ee Lakeridge Playground.

Mashruuca waxaa kamid noqon doonaa dhisme ciyaar cusub, dooga cusub ee garoonka, waraabista iyo bulaacadaha garoonka, iyo wadooyin ay mari karaan dadka laxaadka la' oo ah heerarka Americans with Disabilities Act (Sharciga Dadka Maraykanka Laxaadka La', ADA) iyo hormarka mustaqbalka ee koraasta iyo meelaha la iskugu yimaado.

Nashqada garoonka iyo alaabta lagu ciyaaro noocooda iyo qaabkoodu ayaa iminka la isla eegayaa iminka!

**Fadlan kasoo qayb gal xog uruurintaayada onlineka ah:** [www.surveymonkey.com/r/LakeridgePlaygroundRenovation](http://www.surveymonkey.com/r/LakeridgePlaygroundRenovation)



Dib u habaynta beerta waxaa kamid ah:

### ❖ Aaga Ciyaarta

- Jidka loo marayo meesha lagu ciyaaro waxaa lagu samayn doonaa hormar
- Dhamaan alaab cusub oo lagu ciyaariyo oo ah qaab dhismeedyo kala daarka ah oo dhalinyarta iyo caruurta yara waawayn loogu talo galay
- Qaab dhismeed cusub oo buuxinaya badbaadada iyo heerka jidada wakhtigan
- Aaga lagu ciyaaro ayaa la samayn karaa waxaana la balaadhin doonaa waxoogaa si baahiyaha loo buuxiyo

### ❖ Garoob kubad

- Doog cusub, wareebis iyo bulaacado
- Jidad wanaagsan oo garoonka iyo meelaha la fadhiisto ah iyo garoomaha kale ee kubada ah (taas oo miisaaniyada ku salaysan)

### ❖ Karoonka kubada koleyga

- Jidka loo marayo garoonka kubada koleyga waa la hagaajin doonaa
- Garoonka kubada kolayga wuu sii jiri doonaa waana la dheereyn doonaa – waxaa dhici karta in la balaadhiso si dhawr garoon ahaan loogu isticmaalo
- Garoonka kubada teeniska waa la iska dayn doonaa maadaama oo uu u baahan yahay in si joogto ah dayactir loogu sameeyo si busha shubkiisa loo wanaajiyo

### ❖ Nashqada la eegayo waxaa sidoo kale kamid ah:

- Meesha gawaadhida la dhigo ee ADA iyo wadooyinka suuliyada dib u habayn ayaa lagu samayn doonaa
- Kuraasta iyo meelaha la iskugu yimaado waa la habayn doonaa waxaana loo samayn doonaa wadooyin
- Qasabado cusub oo biyaha laga cabo ayaa la samayn doonaa – kuwaas oo kolba sida miisaaniyada loo helo loo samayn doono
- Jid cagtu marto oo ku xidhan jidhka mashruuca Seattle Public Utilities (Adeega Shacabka Seattle, SPU) ayaa la samayn doonaa (eeg linkiga hoose)

Si aad macluumaad badan uga ogaato habaynta Mashruuca Badalka SPU's Lower Taylor Creek fadlan booqo:

[www.seattle.gov/util/environmentconservation/projects/taylorcreek/](http://www.seattle.gov/util/environmentconservation/projects/taylorcreek/)

**Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca fadlan booqo:**

[www.seattle.gov/parks/about-us/current-projects/lakeridge-playground-improvements](http://www.seattle.gov/parks/about-us/current-projects/lakeridge-playground-improvements)

### Kulanka Kowaad ee Bulshada

Maarso 6, 2019 6:30 galabnimo  
Rainier Beach Community Center  
8825 Rainier Ave S, Seattle

Su'aalo: [Libby.hudson@seattle.gov](mailto:Libby.hudson@seattle.gov)



**Waa hibo wanaagsan in la arko  
cida bandhiga samaynaysa.**

– Ralph Waldo Emerson






Figure 2- Lakeridge Playground location - King County IMAP